**XEERKA MADAXWEYNAHA JAMHUURIDAA**

**Lamb. 2358 ee 9 Diseembar 1952**

**XEER NIDAAMIYAHA MAAMUL IYO XISAABAHA EE MAAMULKA WALAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA (A.F.I.S.)**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

KADIB markii la arkay faqradda 1aad ee qodobka 77 iyo faqradda 5aad ee qodobka 87 ee Dastuurka;

KADIB makii laga baaran degey sharciga lamb. 1301 ee 4 Nofeembar 1951;

IYADOO la tixgeliyey metelaadada lagu siiyey qodobka 3 ee isla sharcigaasi;

IYADOO la tixgeliyey araaga Maxkamadda Xisaabaha ee Qeybtiisa isku darsan;

IYADOO la tixgeliyey aragtida Golaha Wasiiradaha;

IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta Guddomiyaha Golaha Wasiradaha, Wasiirka Arrimaha Dibedda iyagoo la tashtay Wasiradda Cadaaladda iyo midka Difaaca;

**WUXUU AMRAYAA:**

**Cutubka 1aad**

Misaaniya Sannadeed

**Qod. 1**

Misaaniyad sanadeedka ee Maamulka Walaayadda Talyaaniga ee Somaliaya wuxuu ka bilowda 1da Janaayo wuxuuna ku eg yahay 31 Diseember ee sanad kasto.

**Cutubka 2aad**

Misaaniyad Hor Dhac-Habeynta-wax ku Darka iyo wax ka Bedelka

**Qod. 2**

Mamulaha ilaa iyo 31 Maay ee sanad kasta wuxuu diyar gareeyn doona misaaniyad hor dhac wuxuuna u gudbin doona Golaha Dhulka, kaas oo soo gudbin doon araagtidooda ilaa 1 Luulyo, waxaana la aqbali doona ilaa iyo bisha Nofeember ee soo socda.

Haddii is waafajinta kharaj iyo daqliga ee Walaayada loo baahan yahay in Dowladda Talyaanigu ay wax qabad maaliyeed ka geysato, waa in la horgeeyo misaaniyadda Wasaaradda Arrimaha Dibedda si looga baaran dego iyadoo lagu lifaaqi doono warbixin khuseeysa.

Qaabka, tirada maalgelinta loo bahan yahay iyo habka wax qabadka maaliyeed ee dowladda Talyaaniga waxaa lagu qaxi doona xeerarka khuseeya

Haddii wax qabadka maaliyadeed uu ka yaryahay intii laga filanaayey, wuxuu Maamulaha Guud qorsheyn doona dib u habeyn si la isku waafajiyo misaaniyadda

Misaaniyadda hor dhaca ah sidoo oo kale qoraalada iyo warbixinadda maamulka ee la xiriira waxaa lagu cadeyn doonaa hab lacageed.

**Qod. 3**

Daqliga iyo kharajka misaayiniiddu waxaa loo kala qeybiyaa cutubyo kala ah mid caadi iyo mid qeyro caadi, waxaa kale oo noqon karan qeybo khuseeyada kala wareejinta maaliyeed ama maliyad lagu shaqeeyo, ama ah qeybo khuseeya cutubyo gaar ah.

Cutubyahada kharajka waxay haddan u kala baxaan qeybyo kala duwan markii loo fiiro nooca adeega, qeyb kaso waxaay khuseeyaan shaqaalaha adeegyadaasi.

**Qod. 4**

Wixii isbedel ah ee lagu suubiyo misaaniyadda waxaa lagu soo saari doonaa dekreetoyin carifi doona kala wareejinta cutubyada la ansixiyey ama xisaabadka arrimaha gaarka ah ama amarro- sharci ee la xiriira wax ku darka daqliga iyo kharajka.

Wax ka bedelidda daqliga waa in uu ku saleysnaada daqliga soo galay
Wixii ku saabsan wax ka badelidda maaliyadda ama guud ahaan markii wax la beddeli doono, waxaa loo baahan yahay in lala tashto Guddiga Maamulka

Marki la doonaya in wax laga bedelo cutubyada la xiriira cutubyada kharajka shaqaalaha mushaaradooada ama gunnoyin dheeraad ah, wax ka bedelid laguma suubin karo haddii marka hore wax laga bedelin nidaamka shaqaalahaasi.

**Qod. 5**

Amar kasto oo wajahaayo is bedelid cusub ama mug weyn waa in loo helaa habkii lagu hirgelin lahaa.

**Cutubka 3aad**

Kormeerka iyo Ilaalinta – Xisabaha iyo Adeegyada Baarista

**Qod. 6**

Waafijinta sharciga iyo kormeeka maamulka maaliyadda iyo kan misaaniyadda waxaa awood u leh Xafiiska Xisaabaha ee Walaayada

Xafiiska Xisaabaha wuxuu si gaar ah u xilsaaran yahay ilaalinta, hubinta daqliga, kormeerka kharaja iyo hubinta xisaabaha iyo maamulka khasnadda iyo baqaarada, iyo howl kasta oo baaris ah oo uu Maamulaha Guud u xil saaro

Waxaa kale oo u xil saran yahay keydinta qorallada hantida iyo qorallada maaliyada ee daqliga iyo kharajka

Xafiska Xisabiyaha waxaa maamuli doono sarkaal uu Maamulaha Guud magacaabi doono.

**Qod. 7**

Haddiii Xafiiska Xisaabaha ay la noqotoo in uu aqbalo qansheegato ama codsi lacageed, wuxuu u gudbin doona isagoo ku lifaaqaya warbixin buuxda xafiiska Maamulaha Guud, kaas oo haddii u arko in uu yahay qoraal sax ah wuxuu ku amri doonaa si qoraal ah lacag bixintaasi. Laakin mar bixin lacageed lama aqbali karo haddii:

1) Lacagta la codsaday ay ka badan tahay inta loogu tala galay cutubkaasi
2) Haddii bixinta lacagtaasi loo baahan yahay in lagu qoro cutub ka duwan kan uu ku tilmaaman yahay
3) Haddii bixinta lacagtaasi ay kuseyso misaaniyada la isticmaalaayo oo ka duwan

mid haraa ah

4) Haddii bixinta lacagtaasi ay khuseyso horumarin lacageed ee saraakiisha oo ka baxsan inta loo ogol yahay.

**Qod. 8**

Baarista in ay waafaqsan tahay sharciga hordhac ah iyo kuwa la soo odhaafay iyo qoraaladda Maamulka waxaa u xil saran Garsoor oo yeelan doono jagada Xisaabiyaha Guud, kana mid noqon doono Huddiga Maamulka sida ku xusan qod. 13 ee dekreetada lamb 2357 ee 9 Diseembar 1952 oo soo sara Madaxweynaha. Garsooruhu wuxuu kale oo awood u leeyahay in uu guddoonka Qeybta Gaar ah ee Maxkamadda Garsoorka fadhisto.

**Qod. 9**

Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Wasaaradda Maaliyadda waxay mas'uul ka noqon karaan in ay baaris iyo hubin ku suubiyaan maamulidda maaliyeed iyo hantida Dhulka Somaliya.

**Cutubka 4aad**

Misaaniyada la Isticmaalay, Mas'uuliydda Saraakiisha Dowladda

**Qod. 10**

Kadib markii ay dhamaato misaaniyada sannad laha ah, xafiiska Xisaabaha waxaay u soo gudbin doontaa Maamulaha Guud warbixinta misaaniyaddii la isticmaalay iyo sida loo maamulay iyadoo ku soo lifaaqi doonta wixii macluumaad ah oo khuseeya. Maamuluhu wuxuu ku ansixi doona amar-sharci kadib markii uu la tashto Guddi maamulka iyo Qeybta Gaar ah ee Maxkamadda.

Misaaniyada la isticmaalay waxaa lagu wargelinaya Wasaaradda Arrimaha Dibedda, kaas oo u sii gudbin doona Wasaaradda Maaliyadda.

**Qod. 11**

Misaaniyada la isticmaalaha wuxuu u qeybsan yahay 2 qeybood, mid la xiriirta maamulka misaaniyad, xisabaha haraaga nool iyo kuwa densan oo haddhow loo si gudbin karo misaaniyadda soo socota; iyo qeybta kale oo khuseeya xaaladda guud ee hantida oo iyadana leh qeyb nool iyo qeyb densan.

**Qod. 12**

Wixii haraa ah ee ka soo baxa misaaniyadda la isticmaalaha waxaa lagu aruurin doona keyd oo Maamulaha Guud amar-sharci ku tilmaami doono in lagu daboolo nusqaan misaaniyadda , ama loo gudbiyo misaaniyadda sanadka cusub, intaas waxaa dheer in haraagasi loo isticmaali karo dhacdo aan lagu tala gelin.

**Qod. 13**

Shaqaalaha darajo iyo qeyb kasto ka tirsan waxaay dhabarka saaranaayaan mas'uulidda ka timaada howshooda oo si kas ah ama kama uga timaado dhibato MaamulkaWalaalayada.

Amarka lagu caddeynayo mas'uuliyaadsi waxaa soo saari doono Maamulaha Guudisagoo la tashtay Guddiga Maamulka. Waxaa la saari kara shaqaalahasi mas'uuliyadda oo dhan ama kala bar dhibaatata la xaqiijiyey iyo qiimaha ka dhumay.

Go’aanadaasi waxaa looga qaadan kara rafcaan Maxkamaddaha.

**Cutubka 5aad**

Heshiisy ada iyo adeegyada dhaqaale

**Qod. 14**

Maamulaha Guud isagoo ka taxaadiraayo markii laga reebo marxladaha gaar ah oo la asbaabeyey, wuxuu soo bandhigayaa tartan guud ee la heeshis kasta oo keeni kara daqli ama wata kharaj. Taas waxaa ka reeban in Maamulka Walaayada ay daneeyneysa heshisyo gaar ah.

**Qod. 15**

Haddi heshiisyadu la geli doono kadib markii ay dhammatay tartaanka guud, waxaa muhim ah in lala tashto Guddiga Maamulka haddii qiimaha heshiisku uu ka badan yahay 200.000. Haddi heshiisku yahay mid tartan la’aan si gaar ah lagu heshiiyey oo uu ka badan yahay 50,000 Shilling waxaa loo baahan yahay in lala tashto Guddiga Maamulka.

Adeegyada la xiriira dhaqaalaha, waxaa loo bahan yahay xeer nidaamiye gaar ah oo lagala tashtay Guddiga Maamulka haddii ay qiimaha ka badan yahay 25.000 Shilling.

**Qod. 16**

Kharajka Maamulka Walaayada ku galo dalka Talyaaniga dhinaca qalabka, adeegyada ama wax kale, waxaa lagu amray iyadoo lala tashtay Guddiga Maamulka iyadoo la dhowraayo shuruucda ka jira Talyaahinga.

**Qod. 17**

Heshiisyadu waa in ay leeyihin muddo iyo waqti go’an.

Waxaa reeban in heshiisyadu laga helo dulsaar markii laga reebo kuwaa horay lagu qoray cutubyada guud iyo kuwa u gaarka ah, lamaga oggola in wax dheeraad la siiyo dadka keena qalabka.

Waxaa la ogol yahay in hormaris qiimaha iyo qaabka ganacsiga ay ka mid tahay heshiiska, taas oo laga doonaayo in la xadido.

**Qod. 18**

Cabashooyinka la xirira ganaaxyada lagu qoray heshiisyada iyo arrimaha la xiriira qoraaladda si toos u duminaaya heshiisa amah or istaagi kara xukumada maxkamadeed waxaa qayixi doona Maamulaha Guud hadii heshiskaasi ka badan yahay 3.000 Shilling iyadoo lala tashtay Guddiga Maaulka

**Cutubka 6aad**

Daqliga iyo adeegyada la mid ah-hey’adaha maamulka

**Qod. 19**

Daqli Maamulka Walaayada waxay ka kooban tahay daqli kasto iyo amah kasto ee Maamulku xaq ugu yeeshay in uu ka qaado isagoo isticmaalaha amar-sharci, dekreetoyinka , xeerarka iyo wixii kale.

Daqli kasta ee soo gala Maamulka Walaayada waa in lagu qoraa misaaniyada hor dhaca ha. Iyadoo loo baahan yahay in kadib markii saraakiisha iyo shaqaalah loo xilsaaray  in ay hubiyaan qaadista iyo wareejinta lacagta, waxaa Maamulka Walaayada qaadi karta lacaga aan lagu qorin misaaniyada hordhac ah.

**Qod. 20**

Hey'adaha maaliyadda waa in ay u gubiyaan bil kasta Maamulka Waalaayadda xisaab celinta llacagaha agu shubay qasnadaha, waqtiga loogu tala galay, kuwaas loo gudbin doono adeegyada ay u shaqeeyaan.

**Qod. 21**

Daqliga aan sinnaba loo soo aruurin Karin oo ay ka mid tahay deymaha laga baaran degey, waxaa awood u leh Maamulaha Guud in uu baa'biyo, haddii lacagtaasi ka badan taha 3,000 Shilling waxaa muhim ah in lala tashto Guddiga Maamulka.

**Qod. 22**

Saraakiisha Maamulka ee u xil saran in ay  soo aruuriyaan daqliga iyo bixinta deymaha oo maamula lacagta dadweynaha ama bixinta deymaha waxaa si toos ah mas'uul uga yihiin maamulkaaasi loo xilsaaran, waxaana ilaalin doono howshooda Madaxa adeegyada ay hoos yimaadan waxaa la farayaa in ay xisab celin joogta ay suubiyaan.

**Cutubka 7aad**

Kharajka-habka loo maamulo-kharajka lagu bixiyo dalka dibediisa

**Qod. 23**

Maamulidda kharajka ku qoran misaaniyadda waxaa ka mas'uul ah Maamulaha Guud, kaaso oo dhowri doona xadka kharajkaasi adeegyada loogu tala galay iyo qodobada ku qoran xeernidamiyadaan.

**Qod. 24**

Waxaa reeban in la qaato howlo dhalin doona waajibaad la kor yeelo Dowladda Talyaaninga oo ka baxsan waajibaadka dhaqaale ee lagu carifay misaaniyadda , ama culeeys dhaqaale ee u jiitamo kadib markii ay dhamaato muddada loogu tala galay Walaayadaan.

**Qod. 25**

Qoraal kasta oo lagu aqbalay heshiisyo ama lagu amray kharaj, ama guud ahaan qoraallada dhalin kara waajibaad dhinaca dhaqalaha ee misaaniyadda Maamulka Walaayada waa in la soo gaarsiya laguna keydiya xafiiska Xisabaha iyo mid Xisaabiyaha Guud si loo fuliyo.

**Qod. 26**

Maamulaha Guud wuxuu siin kara wakiilasho saraakishiisa taas oo la dhowri doono xeendaabka sharci iyo xeer nidamiyaha.

**Qod. 27**

Kadib markii misaaniyada la xiro, waxaa dekreeeto loo soo diray Xisaabiyaha Guud lagu qori doona tirade lacagta haraaga ah oo loo qondeeyn doono misaniyada sanadka la soo dhaafay iyo kuwii ka horeeyey.

**Qod. 28**

Xafiisyada maamulka u xil saran ayaa bixin doono kharajka iyadoo hubsan doono qoraallada iyo caddeymaha ay qaanshegatooyinka wataan, iyadoo la dhowri doono qaabka iyo xeerarka guud iyo kuwa gaarka u ah adeegyada qaarkood. Haddii kharajku khuseeyo hanti guurta ah waxaa haboon hubsasho.

**Qod. 29**

Qorallada lagu bixiyo deymaha lagu leeyahay Maamulka waxaa amraaya Xafiiska Xisaabaha, waxaa saxiixaayo Maamulaha Guud ama saraakiil oo uu wakiisha, waxaa hubin doono Xafiiska Xisaabaha, kadin waxaa aqbali doona Xafiiska Xisaabiyaha Guud, Saxiixa helitaanka bixinta kharajka waxay baa'bineyneysa deynta lagu yeesha Maamulka Walaayada.

**Qod. 30**

Waxaa si horumaris ah loo bixin karaa:

a) Kharajka la xirira howladha dhaqaale;

b) Kharajka ay marxalad degdeg ah sababto;

c) Kharajka lagu aag ka baxsan caasimadda Walaayadda taas oo aan loo haynin amar bixinees ee toos ah;

d) Kharajyada loogu tala gala shaqaalaha militariga ama kuwa u dhigma; mushaaraadka shaqaalaha iyo arrimo gaar u ah dadka u dhashay Somaliya;

e) Kharajyada ku carifan xeer-nidaamiyaalka u gaar ka ah;

Horumariska bixinta lacagahaasi kama badnaan karaan qiimaha 60,000 Shillin markii laga reebo marxaladaha lagu tilmaamay xarafyada d) iyo e) oo noqon kara tira ka badan;

Fulinta bixinta lacag horumaris ah iyo xisab celinteeda, so bandhigeeda iyo xisaab kormeerkeeda iyo haddi ay haraa yeelato waxaa lagu maamuli doona iyadoo la dhowri doono xeer nidaamiyaha.

**Qod. 31**

Bixinta kharajyada loo qondeeyey muddo carifan waxaa lagu bixin karaa qaab jogto ah.

Lacag bixintaani waxaa soo qori doono xafiiska Xisaabaha oo si joogta u soo wargelin doono xafiisyada qaabilsan iyadoo la tilmaami doono habka bixinta lacagaasi.

**Qod. 32**

Oggolaanshaha, metelaada iyo rahamidda ama qorallada dib-u soo celinta ama wax ka bedelidda rahmidda ee la xirira lacagta ay Walaayadu yeelato waa in lagu muujiya qoraal guud ama qoraal gaar ah oo laga soo ansixiyey xafiiska notaayaha waana in ay kulligood yeeshan qab waafaqsan shurucda Walaayada.

La wareegida, dib- u celista, hor istaaga iyo wax kasta oo qoraal oo leh awood ka hortegid waa in lagu soo wargeliyaa qaabka uu sharcigu tilmaamayo Qoraallada ku tilmaaman faraqyada sare ku xusan waa in ay caddeyaan nooca lahaanshada iyo ujeedada amaahda ee uu toos u xanibaayo, ama la bixinaayo ama wakiilashada la saaray.

**Qod. 33**

Haddii qoraallada khuseeyaa la-wareegidda, rahmidda ama hibeynta ay tilmaamayaan lacag loo tala galay fulinta howl ama keenista qalabka ee hey'ado kale, Walaayadu waxa awood u leedahay in ay hor istaagto gebi ahaan ama qeyb ka mid bixinta lacagtaasi iyadoo weli aysan dhamaanin waqtiga fulinta howlahaasi.

**Qod. 34**

Lacag bixinta ka baxsan xeendaabka dhulka Somaliya waxaa u noqon kara:

a) Guud ahaan iyadoo la waarejiyo lacag oo ay Walaayadu hasyo iyado tixraaceysa xeerarka loogu tala galay;
b) Iyadoo la isticmaalayo lacagta liirada ah ee taala hey'adaha bangiyada markii lacag bixintu ay khuseyso dalka Talyaaniga.

## Cutubka 8aad

Adeega qasnajiga – xisaabaadka gaarka ah-keydinta

**Qod. 35**

Adeega qasnadda ee Walaayada Talyaniga ee Somaliya waxaa fulin doono hey'adaha amaahda ee si gaar ah loogugu xilsaaray kadib markii lagula heshiiyey iyadoo lala tashtay Wasaradaha Arrimaha Dibedda iyo midka Maaliyada.

Heshiiskaasi muddadiisu kama badnaan karto muddo loo carifay Walaayada Talyaaniga ee dhulka Somaliya

Adeega khasnadda iyo howlaha kale ee lagu tilmaamay xeer nidaamiyaha waxaa lagu amri kara in hey'adda fulineeysa loo xilsaaro howlaha xisabaad oo dheeri ah ee lagu heshiiyo laguna maamulo xeerar gaar sh.

**Qod. 36**

Adeega Khasnadda ee ku qoran qodobka 35aad waxaa uu dabooli doona howlaha keydka ee ay Walaayadu u baahato ama ay hey'adaha hoos yimada ama ay ayadu maal gelisay u bahdaan.

**Qod. 37**

Waxaa la amri karaa in laga dhiso keyd ku meel gaar ah ee qeybaha ama adeegyada militariga si loo kaamilo marxaladaha in keydka la waayo si ku meel gaarka ah ama marxalado aan la filaneynin oo lagu tilmaamayo amar-sharci oo loogu tala galay

Mugga hantida keydka ku meel gaarka ah waa mid sanad walba lagu tilmaamyo misaaniyada waxaan xisaab xirkiisu la jaanqaadi doona xisaabxirk misaaniyadda sanad kasta.

## Cutubka 9aad
Adeega maaliyadda

**Qod. 38**

Haddii aysan jirn amaro iyo xeerar u gaar ama heshiisyo gaar ahaaneed ee lala galay hey'ado guud ama kuwa gaar loo leeyaha, adeega maaliyaddu oo si ku meel gaar ah loogaga baahdo adeega qasnadda waxaa Walaayaddu ku amri doona amar-sharci.

## Cutubka 10aad
Xisaab celinta maxkamadeed

**Qod. 39**

Hey'adaha ka mid ah maamulka lacagta ama hantida, waxay sanad kasto keeni doonan xisaab celin oo ay ku soo dari doonaan xisaab celinga haddi ay jiraan hey'ada xiriir la leh sida ku cad xeerarkooda.

Waxaa ka reeban xisaab celinta maxkamadeed saraakisah dowladda iyo kuwa militariga ah kharjyadad ay si horumaris ah u heleen ama qalab guurto ah, taaso oo ay ka mid yihii ilaalinta ama istimaalka cilmi barista iyo farshaxanka.

**Qod. 40**

Maamuluhu waa in uu ku diyaariyay xafiiskiisa xisaab celintaasi, haddii aanan la horkeenin ilaa dhamaaadka 3da bilood eek u xigta muddadii sanad xisaabeedku uu ku ekaa.

Xisaab celintu …….

**Qod. 41**

Xisaab celinta maxkamadeed oo ay dib u eegtay xafiiska Xisaabaha oo la soo aqbalay waxaa loo gudbin doonoa Xafiiska Xisaabaadka Guud sida ku cad qod. 8 ama haddii taas la waayo waxaa loo gudbin doona Qeybta gaar ah ee Maxkamada Garsoorka.

Isla habkaasi waxaa lagu dabaqii doona xisaab celinta ku xusan qod. 22.

**Qod. 42**

## Cutubka 11aad
Hantida Guud

**Qod. 43**

Maamulaha wuxuu qabanqaabi doona habeynta iyo dib u eegidda tirakoobka hantida guud ee Somaliya iyo maamulkooda. Bixinta hantida guud, haddi aysan jirin amaro gaar ah waxaa awooda iska in uu Maamuluhu soo saaro dekreetoyin.

Dekreetada oo lagu daabacay tilmaanta Dowladda, waxaa lagu qori doona Faafinta Rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka Jamhuuriyadda Talyaniga.

Waxaa la faraya in la dhowro dadkana ay dhowraan.

Roma 9 Disember 1952

EINAUDI
**De Gasperi – Pella**

Waxaa arkay – Ilaaliyaha Tilmaanta: **Zolli**

Waxaa lagu qoray Maxkamadda Xisabaad – 20 Disember 1952

Qorallada Dowladda, keyd lamb. 64, bogga lamb. 15 - **Palla**